

Machadka Cilmi baarista STEAM waxay u furtay Mala awaalo Adayda Dugsiga Dhexe ee DCSD: Waxaa maalgeliyay NASA iyo Georgia Tech

Sida waafaqsan wargelinta 2021 ee ka timid [Ururka Sayniska Qaranka](#), kaliya boqolkiiba sagaal oo Ameerikaanka Afrikaanka ah ayay ka koobanyihiin shaqaalaha STEM. Carla Kabwatha, oo macalimad ka ah Dugsiga Dhexe Freedom, ayaa ka shaqeyneysa kordhinta tirooyinkaas iyadoo qabanqaabineyso xerada xagaaga STEAM (sayniska, tejnoolijiyada, injineernimada, farshaxanka, iyo xisaabaha) ee ardayda dugsiga dhexe.

Machadka Cilmi baarista STEAM, oo la bilaabay 2020, waxaa si wadajir ah u kafaala qaaday Machadka Tejnoolijiyada Georgia iyo NASA. Barnaamij labo isbuuc ah ee Freedom Middle wuxuu ka koobanyahay afar fasalo: Cilmi baarista 101, Naqshada Robodka iyo Barnaamijka, Anshaxa Tejnoolijiyada iyo Qiyamyada, iyo Dhijitaalka Sawirada dhaqaaqa.

Xerada ayaa bilaabatay kadib tartan robodiyada ah oo ka dhacay Georgia Tech, halkaasoo borofosoor, Dhaqtar Thomas Orlando, uu la dhacay shaqada kooxda robodiyada Gabar Kabwatha. Wuxuu si gaar ah ula dhacsanaa diirad saarkooda cilmi baarista oo wuxuu ku casuumay inay u martigeliso xerada sida qeyb ka ah wacyigelinta.

“Georgia Tech waxay heshiis la leedahay NASA oo waxay ka shaqeyneysaa mashaariic kala duwan oo NASA,” Gabar Kabwatha ayaa tiri. “Wuxuu yiri maadaama aan diirada saarno cilmi baaris, ka waran hormarinta xerada? Taasi waa sida xeradaan ku timid. Sannadkaas koowaad wuxuu ku saabsanaa ka shaqeynta manhaj loogu talloagalay xerada iyo sida aan u rabay inaan maamulo, Dhaqtar Orlandona ayaa bixiyay lacagaha.”

Machadka Cilmi baarista STEAM, kaasoo dhaca dabayaaqada Juun, ayaa dhawaan waxaa maalgeliyay NASA oo shanta sanno ee xigta, taasoo u ogolaaneyso ardayda inay uga qeybgalaan xerada si bilaash ah. Inta lagu jiro xerada, ardayda waxay ka qeybgalaan cilmi baaris oo waxay dhisaan mashruuc robod taasoo la xukminayo maalinta ugu dambeyso ee xerada. Illaa 45 arday ayaa ka qeybqaadan karto; macalimiinta waa macalimiin shaqada ka fariistay iyo arday hore oo Gabar Kabwatha.

“Qof aan garanayo oo aan dareemo ayaa siinayo waxbarashada tayada ugu wanaagsan ardayda,” ayay tiri.

Mid ka mid ah macalimiinta ayaa ah ardaygeeda hore, Travis Herndon, Kaasoo dhawaan ka qalin jabiyay Machadka Kulliyada DeKalb. Wuxuu ku sii socdaa Georgia Tech oo wuxuu baran doonaa injineernimada madaniga. Gabar Kabwatha waxay ku dhiirogelisay inuu sahmiyo fursado badan oo STEM/STEAM oo loo marayo naadiga robodiyada markii uu ka ahaa arday Freedom Middle, oo ay ku jiraan Machadka Cilmi baarista STEAM.

“Waxaan ka qaatay imtixaanka robodiyada dugsiga hoose, markaa markii aan gaaray dugsiga dhexe, waxay xaqiiqdii si qoto dheer ah ii gelisay FLL (Horyaalka Koowaad ee Lego),” Travis ayaa yiri. “Waan ka mahadcelinayaa in la iisoo bandhigay STEM. Ku luglaahaanshaha STEM igama caawin kaliya xirfadaheya farsamada, barnaamijka, iyo dhismaha, laakiin sidoo kale waxaan helay xirfadaha hogaamineed. Waxaan sidoo kale bartay sida si wanaagsan loola xiriiro kooxda dhexdeeda oo waxaan bartay xirfadaha shaqo kooxeedka. Waxay ii soo bandhigtay xirfado badan.”

Gabar Kabwatha waxay tiri xeradaan xagaaga iyo barnaamijyada kale ee STEM/STEAM waxay ardayda baraan xirfadaha sayniska iyo dhameystiran.

“Ka shaqeynta aaladaha iyo qaabeynta robodka ayaa si macno leh u siiyo xirfadaha fikirka muhiim ah, ayay tiri. “Taas kama heli karaan buuga qoraalka. Waxay sidoo kale isbadel ku sameyneysaa buundooyinka imtixaankooda.”

Gracy Wah, arday kaloo hore ee ka socda Freedom Middle, ayaa ugu adeego macalin ahaan xerada sannadkaan. Waxay ka sii wadeysaa barashada injineernimada hiddaha Machadka Tejnoolijiyada California.

“Waxaan marwalba jeclahay xisaabta, laakiin ka ahaanshaha cilmi baare kooxda Gabar Kabwath ayaa i jecleysiiyay inaan dabagalo cilmi baaris goobtaan STEM,” waxaa yiri Gracy. “Aad ayaan ugu mahadcelinayaa Gabar Kabwath iyo robodiyada. Waxay ii soo bandhigeen STEM, laakiin sidoo kale waxay i bareen shaqo kooxeedka.”